



ISTICMAALKA KAARKAAGA eWIC EE OREGON

Si aad si fudud u heli karto lacagta kuu hartay, waxyaalaha aad gadatay iyo macluumaadka kale, booqo:

www.ebtedge.com

Ama, wac khadka bilaashka ah ee Adeega Macmiilka ee furan 24/7:

1-844-234-4946

BILAABIDA HAWSHA: WAXAAD KAARKAAGA U DOORATAA PIN LAMBAR


Marka hore intaadan isticmaalin Kaarkaaga eWIC ee Oregon waa in aad doorataa Lambarka Aqoonsiga Shakhshi ahaaneed (PIN) oo ka kooban 4 lambar.

Booqo Internet-ka Ama Wac

- Wac Adeega Macmiilka
1-844-234-4946

AMA

- Waxaad gashaa www.ebtedge.com adigoo gelinaya 16 lambar ee kaarka ku qoran



Waxaad doorataa PIN lambar

- Waa in aad doorataa Lambarka Aqoonsiga Shakhshi ahaaneed (PIN) ee kaarkaaga oo ka kooban 4 lambar.
- Dooro 4 lambar oo ay sahlan tahay in aad xasuusato laakiin ku adag dadka kale in ay qiyaasaan.



PIN Lambarkaaga Ilaasho

- Qofna ha u sheegin PIN lambarkaaga.
- PIN lambarkaaga ha ku qorin kaarkaaga korkiisa ama ama wixii kale ee aad la isticmaasho kaarkaaga.



ISTICMAALIDA KAARKAAGA

Waxaad ka soo adeegan kartaa dukaan kasta oo laga soo adeegto oo ku yaala Oregon oo qaata WIC.

Soo Gado Cuntooyinka WIC

- Ogow lacagta gargaarka cuntada ee kuugu hartay WIC marka aad tagto dukaanka.
- Liiskaaga Cuntada WIC u isticmaal si aad u fiiriso cuntooyinka la ogol yahay.



Dhamaystir Wax Gadashadaada

- Had iyo jeer marka hore isticmaal WIC.
- Qofka dukaanka ka shaqaynaysa la socodsii in aad isticmaalayso kaarkaaga eWIC.
- Waxaad gelisaa 4 lambar ee PIN lambarkaaga marka lagaa codsado.
- Ilaasho xaashidaada risiitka; waxay tilmaamaysaa lacagta gargaarka ee kuu hartay.



Raac Xeerarka U Yaala Barnaamijka WIC

- Waa lagaa joojin karaa barnaamijka WIC haddii aad si xun u isticmaasho kaarkaaga ama gargaaradaada.
- Ha gadin kaarkaaga eWIC, cuntooyinka WIC ama caanaha carruurta 'formula' ee WIC.
- Ha soo celin cuntooyinka WIC ama caanaha carruurta 'formula' si aad u weydaarsato lacag ama credit.




WAXAAD FAHANTAA GARGAARADAADA

Waa muhiim in aad garanayso marka aad helayso gargaaradaada iyo tirada lacagta kuugu jirta kaarkaaga.

Helidda Gargaarka

- Gargaaradaadu waxay doonaan kuwo la helayo maalinta u horreysa bisha saacadu markay tahay 12:01 habbeenimo Wakhtiga Baasifika.
- Gargaarada aanan la isticmaalin looma wareejin jaro bisha xigta.



Fiiri Lacagta Kaarka Kuugu Hartay

- Si aad u fiiriso lacagta kuu hartay, waxaad fiirisaa xaashidaadii risiitka ee u dambaysay **AMA**
- Waxaad gashaa **www.ebtedge.com**, **AMA**
- Wac Adeega Macmiilka eWIC 1-844-234-4946, **AMA**
- Waxaad aadaa halka lacagta laga bixiyo dukaanka.



Halka Laga Helayo Taageero

- Su'aalaha ku saabsan **gargaaradaada cuntada WIC**, fadlan la xiriir xaruntaada WIC.
- Su'aalaha ku saabsan **Kaarkaaga eWIC ee Oregon**, fadlan waxaad gashaa **www.ebtedge.com** ama wac Adeega Macmiilka eWIC 1-844-234-4946.



KAARKAAGA IYO PIN LAMBARKAAGA KA DHIG KUWO AAD ILAALISO

Haddii ay dad kale helaan kaarkaaga oo ay garanayaan PIN lambarkaaga, markaa way isticmaali karaan dhammaan gargaaradaada — **gargaaradan beddelkoodana lama heli doono.**

Daryeelka Kaarka

- Kaarkaaga meel fiican ku ilaasho, sida boorsada jeebka ama boorsada caadiga ah.
- Ha wasakhayn kaarkaaga.
- Kaarkaaga ka foguee bir-labta 'magnets' iyo elektarooniga.
- Kaarkaaga ha kaga tegin meel iftiinka qoraxda si toos ah ugu aadan.




Badbaadada PIN Lambarka

- Dadka ha la wadaagin PIN lambarkaaga.
- Haddii aad rabto in qof kale wax kuu soo gado, waxaad xaruntaada WIC ka codsataa helidda kaar kale oo loogu tala galay qof labbaad oo kaar leh oo aad aaminsan tahay.



Beddelka PIN/Kaarka

- Haddii aad ilowdo PIN lambarkaaga, wac Adeega Macmiilka eWIC 1-844-234-4946 ama waxaad gashaa **www.ebtedge.com** si aad u beddesho.
- Haddii kaarkaagu lumo, la xado ama waxyeelo soo gaarto, wac Adeega Macmiilka eWIC 1-844-234-4946.



Maxaa dhacaya haddii aan ilaawo PIN lambarkayga ama si khalad ah u geliyo?

Haddii aad si khalad ah affar jeer u geliso PIN lambarkaaga, kaarkaagu wuu is xiri doonaa ilaa laga gaarayo saqda dhexe. PIN lambarkaaga waad beddeli kartaa intaadan mar affaraad isku dayin in aad geliso adigoo wacaya Adeega Macmiilka eWIC ama gelaya **www.ebtedge.com**. Haddii aanad mar kale samaysan PIN lambarkaaga, kaarkaagu wuxuu si toos ah isku furi doonaa saqda dhexe, si kastaba ah ahaatee wali waa in aad garanayso PIN lambarkaaga si aad u isticmaasho.

Sideen u beddeli karaa gargaaradayda cuntada WIC?

Xaruntaada WIC kala hadal beddelida gargaaradaada cuntada WIC.

Maxaa dhacaya haddii aan ilaawo kaarkayga marka aan aado dukaanka?

Waa in aad haysataa kaarkaaga eWIC ee Oregon si aad u isticmaasho gargaaradaada WIC.

Maxaa dhacaya haddii aan guuro ama beddelo cinwaankayga?

Waa in aad la xiriirtaa xaruntaada WIC haddii aad guurto ama aad beddesho cinwaankaaga.